

Title I, Part A waa barnaamij ay dawlada dhexe maalgaliso oo uu waajibiyey xeerka Ilma Kastaa waa inuu Meelmaraa (ESEA) oo lacag gargaara lagu siiyo hayadaha iyo dugsiyada dadwaynaha ee ay dhigtaan arday badan oo hesha quraac iyo qado jaban ama bilaasha. Kaydka barnaamijka Title I waxaa lagu maalgaliyaa si kor loogu qaado waxbarashada ardayda iyo is dhexgalka qoyska.

Tusaale, adeegyada Title I, Part A lagu bixiyey waxaa ka mida:

- Adeega dheeraadka ah ee xisaabta & akhriska
- Barayaal Gaara oo Tabobaran
- Dheeraynta wakhtiga waxbarashada
- Dugsiga Xagaaga
- Kulamada isdhexgalka qoysaska si waxbarashada ardayga kor loogu qaado

Waalid ahaan hadii aad qabto su'aalo ama walaac ku saabsan sida kharashka dugsiga ilmahaaga loo isticmaalo, la xidhiidh:

Pamela Faulkner Maamulaha: Title I/LAP [pdfaulkner@seattleschools.org](mailto:pdfaulkner@seattleschools.org)

Hadii aad qabto su'aalo kale ama aad rabto inaad dacwad ku saabsan habka loo isticmaalo kharashka soo dugbiso, waxaad habka uu muwaadinku wax u dacwayn karo ka heli kartaa:

Internetka

[Online](#) | Telefoon (360) 725-6100 | TTY (360) 664-3631 | FAX-ka (360) 586-3305

Su'aalahaaga u soodir

Attn: Citizen Complaint Title I, Part A  
Office of Superintendent of Public Instruction  
P.O. Box 47200  
Olympia, WA 98504

Dugsiyada Dadwaynaha Seattle waxay bixiyaan fursado waxbarasho iyo shaqo loo siman yahay

Dugsiyada Dadwaynaha Seattle waxay bixiyaan fursado waxbarasho iyo shaqo loo siman yahay, cidna kuma cunsuriyeeyaan barnaamijyada ama ciyaaraha xaga jinsiga, midabka, diinta, qabiilka, wadaniyada, da'da, dhaqaalaha, ciduu jecelyahay, sida jinsiyada uu la caano maalo, inay uur leedahay, in la qabo, muuqaalka, in uu leeyahay laxaad la'aan xaga maskaxda ama jidhka ah, inuu ciidamada qalabka sida ka baxay

ama ku jiro, ama uu isticmaalo xawayaan ama ey haga. Dugsiyada Dadwaynaha Seattle waxa kale oo ay hayaan oo ay dadku u siman yihiin Boy Scouts iyo kooxaha kale ee dhalinyarta.

Dugsiyada Dadwaynaha Seattle way ku dhaqmaan dhamaan xeerarka gobolka iyo dawlada dhexe sida xeerka Tacliinta ee Title IX ee la sameeyay 1972; iyo xeerka xuquuqda qofka ee Title VI ee 1964; Xeerka dibu sixida 504 ee 1973; xeerka Dadka laxaadka la' ee 1990 iyo isbedelka xeerka lagu sameeyey 2008; Xeerka Washington ee la dagaalanka cunsuriyada RCW 49.60. Dugsiyada Dadwaynaha Seattle way tixgeliyaan dhamaan barnaamijyada degmada sida maadooyinka, ciyaaraha, ciyaaraha dheeraadka ah, adeegyada iyo isticmaalka dhismeyaasha.